JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND
جمهورية صومالילاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT
مكتب الرئيس

Tix; JSL/XM/WM/222-280/072026

Taariikh: 06/07/2026

# WAREEGTO MADAXWEYNE

## Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Xeer Lr; 63/2026.

**Markii aan arkay:** Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan arkay:** Qodobada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan helay:** Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiillada ee Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Xeer Lr; 63/2026 (Go'aan Lr. GW/KF-14/16/14/2026), ee summaddiisu tahay GW/G/12/201/2026, kuna taariikheysan 24/06/2026.

**Waxa aan soo-saaray:**

Wareegtadan oo lagu dhaqan-gelinayo laguna faafinayo Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska ee Xeer Lr; 63/2026.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Ujeedo: - Go'aanka Ansaxinta Wax-k-a baddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland

## Xeer.Lr.63/2026

GOLAHA WAKIILLADU

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: - | Qodobbada 124aad, 24aad, 26aad, 27aad, 29aad, 32aad, iyo qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu ka duulay: - | Nuxurka qodobka 112aad ee Dastuurka Qaranka JSL kaas oo si cad u qeexaya nabadgelyada gudaha iyo kaalinta ay ku leeyihiin maamulada gobolada iyo degmooyinka. |
| Markuu tixgaliyay: - | In nafta aadamuhu ay tahay deeq Ilaahay, qof kastaana uu xaq u leeyahay noloshiisa, wuxuu ku waayi karaa oo kaliya marka maxkamadda horteeda uu kaga caddaado dembi uu xeer jideeyey. |
| Markuu qiimeeyay: - | In dhismaha iyo tababaradda ciidanka boolisku uu muhiimad gaar ah u leeyahay dhismaha qaranka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu arkay: | Soo jeedinta xukuumadda ee wax ka beddelka iyo kaabista xeerkan Booliska ay kusoo sameysay. |
| Markuu U Codeeyey: - | Ansaxinta Waxka baddelka iyo kaabista xeerka ciidanka Booliiska Somaliland **Xeer Lr. 63/2026 Kalfadhigii 14aad Fadhigiisii 10aad** kuna Taariikhaysnaa **13/06/2026** oo ay Goob joog ahaayeen **55** Mudane. |



XAFIISKA ARKIIFIYADA
MADAXTOOYADA

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo sagaal iyo labaatan **(38 ) cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Wax-ka- Baddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland Xeer Lr. 63/2026**

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon) |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL | Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

KAFIISKA ARKIIFIYADA
MADAXTOOYADA

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILLADA

## Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland

Xeer.Lr.63/2026

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## *GOLAHA WAKIILLADU*

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: - | Qodobbada 124aad, 24aad, 26aad, 27aad, 29aad, 32aad, iyo qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu ka duulay: - | Nuxurka qodobka 112aad ee Dastuurka Qaranka JSL kaas oo si cad u qeexaya nabadgelyada gudaha iyo kaalinta ay ku leeyihiin maamulada gobolada iyo degmooyinka. |
| Markuu tixgaliyay: - | In nafta aadamuhu ay tahay deeq Ilaahay, qof kastaana uu xaq u leeyahay noloshiisa, wuxuu ku waayi karaa oo kaliya marka maxkamadda horteeda uu kaga caddaado dembi uu xeer jideeyey. |
| Markuu qiimeeyay: - | In dhismaha iyo tababaradda ciidanka boolisku uu muhiimad gaar ah u leeyahay dhismaha qaranka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu arkay: | Soo jeedinta xukuumadda ee wax ka beddelka iyo kaabista xeerkan Booliska ay kusoo sameysay. |

Wuxuu Ansixiyay

Wax ka baddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland
Xeer.Lr.63/2026

***Wax ka badelkii labaad***
***Second amendment***

# CUTUBKA 1AAD
# MABAADII'DA GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Xeer.Lr.63/2026.

## Qodobka 2aad
## Erey bixin

| | |
|---|---|
| **Madaxweyne: -** | Waxa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Wasiir: -** | Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha J.S.L |
| **Taliyaha ciidanka: -** | Waxa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Booliska: -** | Waxa loola jeedaa Ciidanka Booliska Jamhuuriyada Somaliland |
| **Taliska** | Waxa loola jeedaa Taliska Ciidanka Booliska. |
| **Qayb: -** | Waxa loola jeedaa Taliska Ciidanka Booliska ee heer Gobol. |
| **Waax: -** | Waxa loola jeedaa ciidan xirfad gaar ah u qaabilsan Ciidanka Booliiska, sida: Ciidanka nabadgelyada waddooyinka, dembi baadhista iyo ciidanka wardoonka. |
| **Askari: -** | Waxa loola jeedaa xubin kasta oo Ciidanka Booliiska ka mid ah oo aan derajo lahayn. |
| **Sarkaal: -** | Waxa loola jeedaa xubin kasta oo ciidanka Somaliland ka mid ah oo gaadha deraja xiddigle iyo wixii ka sarreeye. |
| **Sarkaal xigeen: -** | Waxaa loola jeedaa xubin kasta oo ciidanka booliska ka mid ah oo leh derajada u dhaxeysa alifle illaa kormeere saddexaad. |
| **Ciidanka: -** | Waxa loola jeedaa Ciidanka Booliiska J.S.L. |
| **Mudnaan: -** | Waxa loola jeedaa kala sarreynta xubnaha Ciidanka Booliska Somaliland "seniority" |
| **Mutaysi: -** | Waxa loola jeedaa kasbashada dallaacadeed ama u garashada, aqoon ee ay xubintu istaahisho "Merit." |
| **Hakin: -** | Waxa loola jeedaa ka joojin shaqada si ku meelgaadh ah "Suspension" |
| **Gef: -** | Waxa loola jeedaa fal lagu mutaysan karo ganaax asluubeed |
| **Dambi: -** | Waxaa loola jeedaa fal gaadhsiisan xukun maxkamadeed |
| **Xeer Ilaaliye: -** | Waxa loolla jeedaa Xeer ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamada |

GOLAHA WAKILADA ARKIIFYADA J. SOMALILAND

XAFIISKA ARKIIFIYADA MADAXTOOYADA

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerkani waa:-

1. Inuu aasaaso qaab dhismeedka, awoodaha iyo waajibaadka Ciidanka Booliiska.
2. Inuu sugo waajibaadka,-xuquuqaha iyo masuuliyada xubnaha booliska, ahaadaana kuwo sharciga ku salaysan.
3. In kor loo qaado lana tayeeyo kartida Ciidanka Booliska Somaliland iyo adeegyada bulsho ee ay qaranka ugu xilsaaran yihiin.
4. In Ciidanka Booliska Somaliland loo tababarro, loona habeeyo qaab waafaqsan shuruucda dalka & tan caalimaga ah.
5. In la yareeyo waxyeelada ka dhalata fulinta hawlgallada Ciidanka Booliska, lana helo dariiq sharci oo lagu xalliyo cabashooyinka ay qabaan dadweynuhu, si kor loogu qaado kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan Ciidanka Booliska.
6. In si sharci ah loo qeexo doorka booliska ee ilaalinta amniga guud, xasiloonida iyo ilaalinta nafta iyo hantida muwaaddiniinta.

## Qodobka 4aad
## Habka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan xubnaha Ciidanka Booliska Somaliland ee waqtiga xeerkani dhaqangalo u diiwaangashan Ciidanka Booliska Somaliland iyo dhammaan xubnaha sifo xeerkan waafaqsan loogu diiwaangaliyo Ciidanka Booliska Somaliland.

# CUTUBKA 2AAD
# MASUULIYADDA GUUD EE CIIDANKA BOOLIISKA

## Qodobka 5aad
## Ciidanka Booliska Somaliland

Ciidanka Boolisku waa:

1. Qayb ka mid ah Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland
2. U adeegaha bulshada, isagoo ka madaxbanaan loolanka siyaasadeed, dhexna u ah Xisbiyada ama ururrada siyaasadeed ee qaranka iyo bulshadaba.
3. Inuu u guto xilkiisa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka.
4. In uu ka qayb qaato difaaca dalka xaaladdaha dagaalka iyo xaaladaha degdegga ah isagoo gacan ka siinaya Ciidanka Qaranka, si waafaqsan Dastuurka J.S.L.

## Qodobka 6aad
## Masuuliyadda Guud ee Ciidanka Booliska

Booliska Somaliland waxaa loo dhisay in ay masuul ka ahaadaan:

**B)** Sugidda ammaanka guddaha ee dhulka Jamhuuriyadda Somaliland
**T)** Ilaalinta Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND



XAFIISKA ARKIIFIYADA

J) Ciidanka Boolisku markuu gudanayo masuulliyadaha ku xusan faqradda "B" iyo "T" ee qodobkan waxa loo raacayaa sida ku xusan Qodobka 16aad ee xeerkan.

X) Masuuliyadaha qodobkan iyo qodobbada kale ee xeerkan ama xeer kale xilgudashadooda ay ku saarayaan Ciidanka Booliska, looma macnaysan karo inay ciidanka u bannaynayaan ka horjoogsiga muwaaddiniinta adeegsiga xuquuqaha iyo xoriyadaha ay u damaanad qaadeen Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee dalka.

## Qodobka 7aad
## Shakhsiyadda Qaanuuneed

1. Boliska Somaliland waxa uu leeyahay shaqsiyadiisa qaanuuneed ee u gaarka ah, isagoo yeelanaya magaciisa iyo astaantiisa u gaarka ah oo uu ku dacwoon karo, laguna dacwayn karo. Si waafaqsan xeerkan, Dastuurka iyo xeerarka kale ee xidhiidhka la leh.
2. Booliska Somaliland wuxuu leeyahay madax banaanidiisa maamul iyo maaliyadeed, gudashada shaqadiisana waa u madaxbanaan yahay.

## Qodobka 8aad
## Astaamaha Ciidanka Booliiska Somaliland

1. Astaanta Ciidanka Boolisku waa madax goodir oo dulsaaran barkin, hareerahana kaga wareegsan yihiin laba caleemood oo ku dhex jira midab buluug ah.
2. Astaanta Ciidanka Boolisku waxay gaar u tahay Ciidanka Booliska Somaliland oo kaliya, loomana isticmaali karo u jeeddo kale.
3. Astaanta Ciidan Booliska Somaliland waa inay ka muuqataa dirayskooda, shaambadahooda, aqoonsigooda iyo wax kasta oo u gaar ah ciidanka.
4. waa in magaca oo afran iyo lanbarka askariga booliska ahi ay ka muuqato dirayskiisa.
5. waa inuu askari kastaa yeeshaa kaadh aqoonsi oo uu ku cad yahay magaciisa oo afran iyo lambarkiisa tirisiga askarinimo.

## Qodobka 9aad
## Xuduuda Hawlfulineed ee Ciidanka Booliska

Ciidanka Booliska Somaliland wuxuu ka hawlgelayaa dhammaan xuduudihi dhuleed ee Jamhuuriyadda Somaliland iyo goob kasta oo kale oo sharciga Jamhuuriyadda Somaliland ama sharciga caalamiga ahi ogol yahay inay ka hawlgalaan.

# CUTUBKA 3AAD
# HOGGAAMINTA GUUD

## Qoddobka 10aad
## Awoodda Madaxweynaha ee Ciidanka

1. Madaxweynuhu waa taliyaha guud ee ciidamada J.S.L oo Ciidanka Booliskuna ka mid yahay, sida uu dhigayo qoddobka 90aad ee Dastuurka JSL.
2. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay magacaabidda iyo xilka qaadista taliyaha ciidanka iyo ku xigeennadiisa marka uu la tashado wasiirka, sida uu dhigayo qodobka 90aad faqraddiisa 3aad xarafka (d) ee Dastuurka J.S.L.

3. Waxa kale oo uu Madaxweynuhu ku leeyahay Ciidanka Booliska Somaliland awoodaha ay ka mid yihiin; -
   b) Wuxuu bixiyaa derajooyinka Ciidanka Booliska ee xiddigle iyo wixii ka sarreeya
   t) Wuxuu bixiyaa billad sharafeedyada iyo abaalmarinnada ay mutaystaan xubnaha Ciidanka Boolisku.
   j) Wuxuu Ciidanka Booliska ku hoggaamiyaa siyaasadda guud ee xukuumadda, waxa kale oo uu fuliyaa hawlaha xeerkan iyo xeerarka kale ee kasoo baxa golayaasha Xeerdejintu ee ay awood u siiyaan.

## Qodobka 11aad

## Doorka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Ciidanka

Wasaaraddu waxay Ciidanka Booliska ku leedahay xilalkan iyo awoodahan hoos ku xusan: -

1. Horumarinta iyo kobcinta aqoonta Ciidanka Somaliland.
2. Ka hawlgelidda in la daboolo baahida agabyada kala duwan ee Ciidanka Booliska.
3. Curinta xeerarka, siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha horumarinta Ciidanka Booliska iyo u gudbintooda golaha wasiirrada.
4. Isku xidhka Ciidanka Booliska iyo hay'adaha kale ee xukuumadda.
5. Ka shaqaynta sidii fursado waxbarasho dibadeed iyo kuwo gudaha ahba loogu heli lahaa Ciidanka Booliska.
6. Soo saarista xeernidaamiyayaasha xeerkan iyo xeerarka kale ee Ciidanka Boolisku awood u siiyaan.
7. Kormeeridda iyo dul kala socodka hawlaha Ciidanka Booliska Somaliland.
8. La socodka xaaladda nabedgelyo iyo hubinta in ciidanku guud ahaan hawshoodii u gudanayaan si waafaqsan xeerkan iyo Dastuurka J.S.L.
9. Kala talinta Madaxweynaha magacaabista iyo xilka qaadista taliyaha iyo kuxigeennadiisa.
10. Fulinta hawlaha kale ee xeerkan ama xeerarka kale ee ciidanka ee khuseeya.
11. Uga warbixinta Madaxweynaha iyo golaha wasiirada xaaladda guud ee nabedgalyada dalka

# CUTUBKA 4AAD

# QAABDHISMEEDKA CIIDANKA BOOLISKA

## Qodobka 12aad

## Qaabdhismeedka

Qaabdhismeedka Ciidanka Booliska Somaliland wuxuu ka kooban yahay:

B. Taliska ciidanka booliska oo ka kooban
   I. Taliye
   II. Laba taliye ku xigeen
   III. Hoggaanno
T. Qaybo iyo waaxo toos u hoos taga taliska.
J. Saldhigyo iyo rugo

## Qodobka 13aad

## Awoodda Iyo Masuuliyada Taliyaha Ciidanka Booliska

1. Sarkaalka taliyaha ciidanka booliska loo magacaabayaa waa inuu:-
   b) Leeyahay karti, aqoon akaademiya iyo waaya'aragnimo.
   t) Leeyahay awood hoggaamineed oo uu ku hanan karo xilkaa loo igmaday.
2. Taliyuhu waa masuulka ugu sarreeya hoggaaminta iyo maamulka Ciidanka Booliska.
3. Taliyaha Ciidanka Booliiska Somaliland isagoo dhawraya xeerarka iyo xeernidaamiyaha u degsan Ciidanka Booliiska, wuxuu awood u leeyahay: -
   B. Horumarinta iyo isu xidhka shaqo iyo hawlgalinta ciidanka.
   T. Qorshaynta iyo jaangoynta tirada ciidanka hadba sida baahida shaqo tahay.
   J. Inuu wasiirka arrimaha gudaha si joogto ah ula socodsiiyo xaaladda nabadgalyada guud ee dalka.
   X. Qabyatirka iyo qalabaynta ciidanka sida gaadiidka, isgaadhsiinta iyo inuu hirgaliyo baro caafimaad oo ciidanka u gaar ah.
   Kh. Abuuridda nidaam guud oo la xidhiidha habka qorista booliska iyo shaqaalaynta, aqoonta iyo tababarrada, lebiska dirayska iyo qaadashada Hubka IWM.
   d. Abuuridda xarumaha tababarrada booliska, ka shaqaynta iyo fududaynta helitaanka tababarro aqooneed iyo xirfadeed ee dalka.
   r. Magacaabidda guddi qiimeyneed.
   s. Dalacaadda derajooyinka, wuxuu taliyaha ciidanku awood u leeyahay wixii ka hooseeya xiddigle, isagoo oo ku soo saaraya wareegto.

## Qodobka 14aad

## Shuruudaha Looga Baahan Yahay Taliyaha Iyo Taliye Xigeenkiisa

Shuruudaha lagu xulanaayo taliyaha Ciidanka Booliska Somaliland waa: -

1. Inuu yahay muwaaddin Somaliland u dhashay
2. Inuu muslim yahay, kuna dhaqmo diinta Islaamka.
3. Inuu jidh ahaan iyo caqli ahaanba gudan karo xilkiisa.
4. Inuu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuba toosan yihiin.
5. Inaanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbays ah, shantii sanno ee u danbeeyay.
6. Inuu leeyahay aqoon u dhiganta heer jaamacadeed, amaba uu leeyahay khibrad ciidan oo ah ugu yaraan 15 sanno.

# CUTUBKA 5AAD

# WAAJIBAADKA GUUD EE CIIDANKA BOOLISKA

## Qodobka 15aad

## Waajibaadka Guud ee Ciidanka Booliska

Waajibaadka Guud ee Ciidanka Booliiska Somaliland waa: -

1. Illaalinta iyo sugidda nabadgelyada dalka gudihiisa.
2. Badbaadinta iyo illaalinta nafta iyo hantida guud iyo ta gaar ahaaneed ee dadka.
3. Ilaalinta xoriyaadka aasaasiga ah ee qofka.

4. Fulinta iyo ku dhaqanka shuruucda iyo xeerarka dalka u dejisan
5. Ka hortagga iyo baadhista denbiyada, si waafaqsan xeerarka dalka
6. Tirakoobka iyo ururinta faldanbiyeedka sannad kasta.
7. Dabagalka iyo soo qabashada eedaysanayaasha iyo horgayntooda maxkamadda.
8. Oogista dacwadaha maxkamadaha hortooda ay boolisku wakiil uga noqon karaan falkii iyo heerkii uu Xeer ilaaliyaha Guud u igmado.
9. Xidhiidhka iyo wada shaqaynta hay'adaha amniga ee kale.
10. Xidhiidhka booliska caalamiga ah (Interpol)
11. Ilaalinta iyo sugidda nabadgalyadda diblomaasiyiinta shisheeye ee dalka jooga.
12. Ka qaybgalka hawlaha gurmadka hadii ay dhacaan duruufo lama filaan ah sida duufaanadda, dhulgariirka iwm.
13. Taageerada iyo xoojinta ciidanka qaranka haddii ay timaado xaalad dagaaal.
14. Ilaalinta maamuuska iyo dhawrista xasaanadda iyo karaamadda shakhsinimo ee Golayaasha Qaranka.
15. Ilaalinta xarumaha hay'adaha dawladda, Sugida amniga madaxda sare ee xukuumada, xubnaha baarlamaanka, martida iyo dublamaasiyiinta wadamada shisheeye.
16. Isku dubaridka iyo keydinta xogta denbiilayaasha iyo bixinta caddaynta dambi la'aanta.
17. Samaynta xog isweydaarsiyada iyadoo lala abuurayo xidhiidh iskaashi booliska waddamada aynu jaarka nahay.
18. Fulinta amarrada iyo go'aannada sharciga ah ee kasoo baxa Maxkamadaha iyo xeer ilaalinta
19. Horgeynta markhaatiyada maxkamadaha ee dacwad oogista.
20. Qabashada alaabada kootarabaanka ah iyo u gudbinta hay'adaha cashuuraha.
21. Xaqiijinta ku dhaqanka xeerarka waddo marista gaadiidka iyo baadhista shilalka.
22. Ururinta, qiimeynta iyo ku baahinta hay'adaha ay khusayso denbiyada iyo shilalka guud ee dalka ka dhaca.
23. Fulinta awoodaha iyo waajibaadyada kale ee ay siiyeen xeerarka kale ee dalku.
24. baadhista, dabagalka iyo ka hortagga dembiyada tiknoolajiyadda casriga ah
25. Boolisku wuxuu waajibaadkiisa u gudanayaa si'waafaqsan sharciga, isaga oo aan jebinayn xuquuqaha aasaasiga ah ee uu damaanad qaaday Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 16[aad]
## Awoodaha Ciidanka Booliska

Ciidanka Boolisku wuxuu awood u leeyahay:

1. Inay qabtaan, xidhaan, sharcigana horkeenaan iyaga oo aan haysan waaran maxkamadeed:-
   - b) Haddii qofka lagu qabto isaga oo faraha kula jira fal-dambiyeed (inflagrante delicto)
   - t) Haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo in qofu galay dambi ciqaabtiisu ka badan tahay laba (2) sanno oo xadhig ah.
   - j) Haddii aan waaran maxkameed lagu heli karin wakhtigaasi iyagoo xaaladu degdeg tahay.
   - x) Haddii laga cabsi qabo in qofku baxsado ama aan mar dambe la heli karin

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND

hadii aan isla markaa la xidhin.

Kh) Qofka loo geeyo yeedhitaan maxkamadeed (summons) haddii uu diiddo inuu sheego xogtiisa sida magaciisa ama xogo kale oo lagama maarmaan u ah fulinta yeedhitaanka maxkmada.

d) Qofkasta oo lagu qabto waaran la'aan si waafqsan farqada 1aad waa in lagu horgeeyo maxkamada muddo 48 saacadood gudohood ah si waafaqsan xeerka ciqaabta guud.

2. In ay baadhaan soona qabtaan cid kasta oo lagu tuhmo in ay abaabulayso ama qorshaynayso faldembiyeed ka dhan ah nabadgelyada dalka, nafta iyo maalka shacabka Somaliland iyo dadka shisheeyaha ah ee dalka ku nool sharcigana ku horgeeyaan.
3. Ciidanka Boolisku uma adeegsan karaan rasaas nool dad aan hubaysnayn.
4. Ciidanka Boolisku waxay u isticmaali karaan awood ciidan cid kasta oo iskacaabbin kala hor timaadda markay waajibaadkooda shaqo gudanayaan, si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
5. Awoodda ciidan ee ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan waxay Ciidanka Boolisku isticmaali karaan:-
   B. Markay lagamamaarmaan tahay inay ku badbaadiyaan ama ay ku ilaaliyaan nafaha iyo hantida shacabka ay amaankooda masuulka ka yihiin ama naftooda iyo hubkooda ku badbaadinayaan
   T. Markay ka hortagayaan khatar degdeg ah oo dhimasho ama dhaawac culus ku keenaysa nafaha shacabka ama khatar gelinaysa nafahooda.
   J. Marka la qabanayo qof faldembiyeed culus ku eedaysan oo ka baxsanaya gacan ku haynta booliska ama ka baxsanaya xabsigii uu ku jiray, marka sifo sharci ah lagu baadhayo qof looga shakinsan yahay faldembiyeed culus oo qofkaasi iskacaabbin xooggan kala hor yimaaddo ciidanka ama isku dayay inuu baxsado.
6. Markay Ciidanka Boolisku isticmaalayaan awood ciidan waa inay isa sheegaan, si cadna waa inay u bixiyaan digniin ah inay isticmaalayaan awood ciidan iyo hub. Waxaana waajib ah in awooddu tahay mid u dhiganta (proportional) khatarta ay wajahayaan.
7. Digniinta ku xusan faqradda 6aad ee qodobkan ma bixinayaan ciidanku, haddii ay naftooda khatar galinayso ama aanay ku habboonayn inay digniinta bixiyaan.
8. Askari kasta oo boolis ah oo isticmaalaya awoodda ciidan si'waafaqsan faqradda 4aad ee qodobkan waxa ku waajib ah:
   b) Haddii isticmaalka awooddu ay keento dhimasho ama dhaawac, waa inuu siiyaa adeeg caafimaad oo degdeg ah cida dhibtu gaadhay, sida ugu dhakhsaha badanna u geeyaa goobta caafimaad ee ugu dhow.
   t) Inuu warbixinta dhacdadaas sida ugu dhakhsaha badan ugu gudbiyaa sarkaalka ka sareeya.
9. Ciidanka Boolisku markay gudanayaan waajibaadkooda shaqo ee ku xusan qodobkan waa inay ilaaliyaan xuquuqda qofka ee ku xusan Dastuurka JSL, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.

10. Mar kasta oo Ciidanka Boolisku hawlgal fulinaayo sarkaalka Ciidanka wata oo kaliya ayaa u xaq leh inuu la hadlo cidda hawsha lagu fulinaayo.
11. Si xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka waafaqsan, haddii hawlgallada ay Ciidanka Boolisku fulinayaan ku keento dadweynaha khasaare naf iyo maalba leh, marka baadhista la sugo waxa loo gudbinayaa wasaaradda, si loo siiyo magdhow ku habboon dhibbanaha.

## Qodobka 17aad

## Xilgudashada Xubnaha Ciidanka Booliska

1. Si loo ilaaliyo xilgudashada Ciidanka Booliska, xubinn kasta oo ka tirsan ciidanku waa inay leedahay kaadhka aqoonsiga ee ciidanka iyo dirayskii ciidanka oo uu ku muujisan yahay lambar u gaaar ah xubin kasta.
2. Xubin kasta oo Ciidanka Booliska ahi waxay waajibkeeda u gudanaysaa si' waafaqsan Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
3. Waa in hadal/qoraal loogu sheegaa hawsha ay u xilsaaran tahay, waajibaadkeeda iyo awooddeeda, islamarkaana lagu tababaraa.
4. Tababarrada Ciidanka Booliska iyo noocyadooda ee la siinayo xubnaha ciidanka waxa lagu faahfaahin doonaa xeernidaamiye uu soo saaro wasiirku.
5. Waajibaadyada shaqo ee xubin ama koox loo dirayaa waa inay ahaadaan kuwo sharci ah, isla markaana ku salaysan Dastuurka JSL, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya hawlaha Ciidanka Booliska.

# CUTUBKA 6AAD

# SHAQADA IYO ARRIMAHA CIIDANKA

## Qodobka 18aad

## Shaqada Joogtada ah

Waxa loo aqoonsanayaa in si'joogto ah shaqada booliska ugu jirto xubin kasta oo si'rasmi ah loogu qaatay Ciidanka Booliska oo:-

b) Shaqada ku jirta
t) Fasax ku maqan
j) Shaqada laga hakiyay

## Qodobka 19aad

## Dhammaadka Shaqada Xubnaha Ciidanka

1. Shaqada xubnaha Ciidanka Boolisku waxay dhammaanaysaa haddii ay dhacdo mid ama wax ka badan sababahan soo socda:

b) Geeri ku timaadda xubinta booliska.
t) Haddii uu ama haddii ay gaadho da'da hawlgabka isagoo shaqada sii hayn kara, haddii loo arko lagamarmaan.
j) Haddii dhakhtar caddeeyo in aanu hawsha gudan karin.
x) Haddii ay iscasisho oo isla markaana laga aqbalo, waana in ay ahaataa qoraal rasmiya.

Kh. Haddii shaqada lagaga eryo sifo sharciga waafaqsan
d. Haddii uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

## Qodobka 20aad
## Diiwaanka Guud ee Ciidanka

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska waxay yeelanaysaa fayl u gaar ah oo loo sameeyo maalinta la qoro shaqada, iyadoo dhacdo kasta oo noloshiisa ama nolosheeda ciidannimo la xidhiidha lagu keydinaayo, sida noocyada shaqo ee uu qabtay, tababarrada uu qaatay, waxbarashada uu helay, dallacaadda, xilka, abaalmarinta, anshaxmarinta, beddelka, hoos u dhigidda, denbiyada uu galay, fasaxyada iyo dhacdo kasta oo kale oo ay tahay in la keydiyo, iyadoo faylkaasi yeelanayo lambarka ciidan ee la siiyay maalintii la qoray.
2. Qaabka loo xafidayo, cidda awoodda u leh wax ka bedelkiisa iyo habka lagu oggolaan karo eegistiisa ama nuqulka heliddiisa waxa lagu nidaaminayaa xeernidaamiyayaasha Ciidanka Booliska Somaliland oo uu wasiirka arrimaha gudahu soo saarayo.

## Qodobka 21aad
## Derajada iyo Direyska

1. Derajada iyo dirayska Ciidanka Booliska waxa lagu soo saarayaa xeernidaamiye gaar ah.
2. Xubnaha Ciidanka Boolisku waxay u kala amar qaadanayaan siday u kala derejo sarreeyaan.
3. Haddii laba qof oo Ciidanka Booliska ka tirsani isku derajo noqdaan waxay u fulaysaa kala amar qaadashadoodu siday derejada ugu kala hor qaateen, haddii ay mar wada qaateenna sida uu magacoodu ugu soo kala horreeyo liistada.

## Qodobka 22aad
## Fasaxyada shaqada

Fasaxyada xubnaha booliska, noocyada fasaxa, habraaca fasax bixinta iyo cidda awoodda u leh ogolaanshaha fasax kasta, waxa lagu sheegayaa xeernidaamiyaha xeerkani jidaynayo.

## Qodobks 23aad
## Mushaharka & Gunnooyinka

Xubin kasta oo Ciidanka Booliiska ahi: -

1. Waxay yeelanaysaa mushahar go'an.
2. Waxay yeelan kartaa gunno.
3. Heerarka mushaharka iyo gunnooyinka waxa lagu soo saarayaa xeer madaxweyne, markuu la tashado haya'daha ay khusayso
4. In la siiyo mushahar u dhigma shaqada uu hayo.
5. Waxa kale oo uu mutaysan karaa gunno, waxaana lagu faahfaahinayaa xeernidaamiyaha Ciidanka Booliska Somaliland.

## Qodobka 24^aad
## Abaal Marinta Xubnaha Ciidanka Booliska

1. Xubnaha Ciidanka Booliska waxa la siin karaa abaalgudyadan soo Socda iyagoo qoraal ah faylkiisana loo galinayo: -
   b) Ammaan caad ah
   t) Abaal gud caad lacageed
   j) Ammaan gole joog ah
   x) Abaalgud qiimayn hawleed
   Kh. Billad sharaf ama billad geesi
   d) Dallacaad abaalmarin gaar ahaaneed
   r) Fasax abaalgud
2. Faqradda 1aad ee qodobkan abaalgudyadaas cidda bixinaysa iyo qaabka loo bixinaayo abaalmarinta waxa lagu xusayaa xeernidaamiyaha uu xeerkani jidaynaayo.

## Qodobka 25^aad
## Dhimashada, Dhaawaca iyo Naafada Xubnaha Ciidanka Booliska

1. Xubinta ka mid ah booliska ee lagu dilo isagoo waajibaadkiisa ciidan gudanaaya ama lagu dilo aargoosi ka dhashay waajibaadkiisa ciidan ee uu gudanaayey waxa magtiisa ama magteeda bixinaaya dawladda, waxaana la horgaynayaa caddaalada.
2. Xubinta Ciidanka Booliska ee lagu dilo hawlgal sharciga waafaqsan waxa dhibbane ka ah Qaranka JSL oo ay waajib ku tahay inuu bixiyo magtiisa ama dhaawaciisaba. Ciddii falkaas geysatayna meel kastaba ha tagtee qaranka ayaa ka goosanaya, soona qabsanaya, sharcigana hor keenaya.
3. Xubin kasta oo boolis ah oo lagu dhaawaco ama ku dhaawacanta ama ku naafawda ama waxyeello soo gaadho iyadoo waajibaad ciidan gudanaysa wuxuu ama waxay dawladda xaq ugu leedahay daawayntiisa iyo xanaannayntiisaba.
4. Naafada iyo dhaawaca xubnaha booliska waxa lagu nidaaminyaa xeernidaamiyaha Ciidanka Booliska Somaliland.

## Qodobka 26^aad
## Hawlgelinta Ciidanka

Xubin kasta oo Ciidanka Booliska ka tirsan waxa loo bedeli karaa goob aan ahayn goobtii uu shaqada ka hayay ama shaqo ka duwan shaqadii uu hayay oo la xidhiidha waajibaadka Ciidanka Booliska, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 27^aad
## Qiimeynta Shaqada xubnaha ciidanka

Qof kasta oo ciidanka booliiska ka tirsan, wax qabadkiisa, kartidiisa, asluubtiisa, daacadnimadiisa iyo hawl-karnimadiisa waxaa si joogta ah loogu samaynayaa qiimayn, iyadoo hab-raaca qiimaynta, ka go'aan qaadashada qiimaynta, iyo masuuliyiinta qiimaynta u xilsaaran lagu faahfaahin doona Xeer-nidaamiyaha.

### Qodobka 28aad

### Dhaarta xubnaha Ciidanka

Xubin kasta oo Ciidanka Booliska Somaliland loo qaato marka shaqada la qorayo waa in la mariyaa dhaartan dastuuriga ah ee ku xusan qodobka 129aad ee Dastuurka qaranka una dhigan sidan "WAXAAN ILAAHAY UGU DHAARTAY IN AAN U NOQONAYO DAACAD DIINTA ISLAAMKA, DALKAYGA SOMALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAALAD INTA AAN XILKA HAYO".

## CUTUBKA 7AAD

## ASLUUBTA & ANSHAXMARINTA

### Qodobka 29aad

### Habdhaqanka Asluubeed ee Ciidanka

1. Ciidanka Boolisku waa inuu yeeshaa habdhaqanka asluubeed, kaas oo laga rabo xubin kasta oo Ciidanka Booliska ka tirsan.
2. Habdhaqanka asluubeed ee faqradda 1aad ee qodobkani xusay waxa lagu faahfaahinayaa xeernidaamiyaha Ciidanka Booliska.

### Qodobka 30aad

### Waxyaabaha Ka Reebban Xubnaha Ciidanka Booliska

Xubnaha Ciidanka Booliska waxa ka reebban:

1. In aanay dan gaar u ah u adeegsan awooddooda iyo haybaddooda boolisnimo.
2. Inay qabtaan shaqo kale oo ka duwan tan ciidanka, intay ciidanka ka tirsan yihiin.
3. In aanay kala hor iman hub ciidamada kale ee Qaranka, Ciidanka Booliska dhexdiisa ama dadka rayidka ah, marka laga reebo xaaladaha sharcigu u ogolaaday.
4. Inay xubin ka noqdaan xisbi siyaasadeed ama urur siyaasadeed.
5. Inay bixiyaan xog ama ka warranto xaalad ciidanku la kulmay ama xubintaasi la kulantay.
6. Inay aqbalaan hadyad ama wixii lagu sharfo hadday tahay mid si toos ah lagu siiyey ama cid kale loo soo mariyey.
7. Inay iscasilaaddeeda soo gudbiso iyada oo lagu jiro xaalad dagaal, xaalad degdeg ah ama baadhisi ku socoto.
8. Inay ku kacaan qabyaalad eex iyo qaraabo kiil.
9. Inay ku kacaan musuqmaasuq iyo laaluush.
10. Inay u dhaqmaan si kasoo horjeedda Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo shuruucda.
11. Ciidanka Booliska waxa ka reebban inay awooddooda u isticmaalaan si sharcidarro ah, sida jidhdil, handadaad ama ciqaab ka baxsan sharciga.
12. Ciidanka Booliska waxa ka reebban inay qof muwaaddin ah hadii aanu dambi faraha kula jirin xidhaan, iyaga oo aan haysan waaran soo qabasho oo maxkamadi amartay.

## Qodobka 31aad

## Tallabooyinka Anshaxmarineed

1. Waxa bannaan in xubinta Ciidanka Booliska ee lagu helo gef ka dhan ah xeerkan lagu qaado mid ka mid ah anshaxmarinahan:
   b) Digniin qoraal ah faylkiisana loo galiyo
   t) Mushahar ka goyn aan ka badnayan afar dalool meel ahaan oo mushaharka xubinta muddo aan ka badnayn laba bilood qoraal ah faylkiisana loo galiyo.
   j) Gunno ka joojin muddo aan ka badnayn saddex bilood oo qoraal ah faylkiisana loo galiyo.
   x) Dallacaad ka reebis muddo aan ka badnayn sannad xilliguu mutaystay oo qoraal ah faylkiisana loo galiyo.
   Kh) Xadhig asluubeed aan ka badnayn 42 maalmood.
   D) Cidda awoodda u leh anshaxmarinta waxa lagu qeexi doonaa xeer-nidaamiyaha xeerkan.
2. Tallaabada anshaxmarineed ee ku xusan qodobkani waa wixi la xidhiidha anshaxa.
3. Haddii falka uu gaystay xubinta boolisku ay tahay faldembiyeed waxa loo gudbinayaa hay'adda awoodda u leh si ay tallaabo sharci uga qaaddo.

## Qodobka 32aad

## Dembiyada Ciqaabta

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska oo lagu soo eedeeyo faldembiyeed ciqaab ah waxa la hor-gaynayaa Maxkamadda awoodda u leh, habka garqaadistana waxa loo raacayaa xeerarka habka ciqaabta iyo Xeerka ciqaabta Guud.
2. Faldambiyeedyada ciqaabta ah ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa awood garsoor u leh Maxkamadda Ciidamada si'waafaqsan qodobka 104aad, Faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidanka Qaranka, Xeer Lr. 107/2024.

## Qodobka 33aad

## Reebanaanta iyo Anshaxmarinta Dambiyadda ka dhanka ah Bani Aadanimada

Waxaa ka reeban xubnaha ciidanka booliska:

1. Ma banaana fal dambiyeed kasta oo ka dhan ah bani aadanmimada sida jidh-dilka, Maskax ka dil iyo dhamaan faldambiyeedyada ku sifooba.
2. Xubin kasta oo booliis ah ee ku kacda faldambiyeedyada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan isaga ayaa ka masuul ah
3. Xubin kasta oobooliis ah oo ku sifawda farqada 1aad ee qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa xadhig gaadhaya 5 ilaa 10 sanno.

## Qoddobka 34aad

## Cabbashada ka dhanka ah Ciidanka Booliska

1. Waxaa xeerkan lagu aasaasayaa guddida cabashooyinka iyo dabagalka booliska oo ah guddi madaxbannaan, awoodna u leh qaabilaadda cabashooyinka dadweynaha,

baadhitaanka xadgudubyada booliska iyo soojeedinta tallaabooyin sharci iyo kuwa anshaxmarineed ee ku haboon

2. Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliiska Somaliland waxa loo gudbin karaa guddida cabashooyinka iyo dabagalka booliiska
3. Guddida guddida cabashooyinka iyo dabagalka booliiska ee heer qaran waxa magacaabaya Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga, guddidaasi waxay ka koobnaanaysaa xubnahanm

   b. Xubin ka socota Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga.

   t. Laba xubnood oo sarkaal booliis ah oo uu soo jeediyo Taliyaha Ciidanka Booliiska JSL.

   J. Xubin ka socota Komishanka Maamul Wanaaga

   x. Xubin ka socota Komishanka Xuquuqal Insaanka

4. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga ayaa magacaabaya Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka guddida isaga oo tixgalinaya aqoonta, waayo-aragnimada iyo dhexdhexaadnimada xubnaha.
5. Guddida heer qaran waxay gobol walba ka samayn kartaa guddi heer gobol oo ka kooban saddex (3) xubnood 5 oo soo magacaabaan guddida heer qaran.
6. Guddida heer gobol waxay yeelanaysaa qaabdhismeed iyo waajibaad la mid ah guddida heer qaran, iyaga oo fulinaya hawlaha baadhitaanka cabashooyinka ee ka yimaada gobolka.
7. Muddada xilka guddida heer qaran iyo guddida heer gobol waa saddex (3) sannadood oo ka bilaabmaysaa taariikhda la dhaariyo.
8. Xubnaha Guddida heer qaran waxa dhaarinaysa Maxkamadda Sare. guddida heer gobol waxa dhaarinaysa Maxkamadda Gobolka.
9. Guddida heer qaran waxay xafiis ku yeelanaysaa Caasimada Hargeysa, halka guddida heer gobol ay xafiis ku yeelanayaan xarunta Gobolka.
10. Ciddii ku qanci weyda go'aanka guddida heer gobol waxay u rafcaan qaadanaysaa guddida heer qaran.
11. Guddidu waxay hawshooda u guddanayaan si madaxbannaan oo dhexdhexaad ah. Waxana reebban in cid kasta oo dawli ah ama mid gaar ahi faragelin ku samayso shaqadooda.

## Qodobka 35^aad

## Awoodda Guddida Cabashooyinka Ka Dhanka Ah Xubnaha Ciidanka Booliska

Awoodaha Guddidu waa: -

1. Inay soo baadhaan markay helaan cabasho ka dhan ah xubnin ama koox ka mid ah Ciidanka Booliska waxaanay qaadayaan tallaabooyinkan

b. Inay u yeedhaan dhinacyada (power to summon)

t. Inay dhegeystaan dacwadda dhinacyada

2. Waxay u xil saaran yihiin inay tallaabo ka qaadaan denbiyada ka dhanka ah xuquuqda aasaasiga ah ee bani'aadannimo ee ku xusan xubinta 3aad ee Dastuurka.
3. Inay go'aan ka soo saaraan dembiyada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan go'aankooduna wuxu ku ansaxayaa (2/3) tirada xubnaha cod bixinta leh.
4. Haddii gudidu go'aan ku gaadho in xubinta laga soo cawday ay gashay faldembiyeed waa inay guddidu go'aankooda u gudbiyaan Xeer ilaalinta Maxkamadda Ciidamada, si ay ugu soo oogto dacwad xubintii booliska ahayd ee faldenbiyeedka gashay.
5. Xeer ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamadu waa inuu muddo toddoba cisho gudahood ah ku oogaa dacwadda, isagoo ku horgeynaaya maxkamadda awoodda u leh.
6. Haddii falka loo haysto xubintu aanu gaadhsiisnayn faldembiyeed, waxay guddidu awood u leedahay inay soo saarto go'aan anshaxmarineed.

## CUTUBKA 9AAD
## HANTIDA, QALABKA, HUBKA & MIISAANIYADDA

### Qodobka 36aad

### Diiwaangelinta Hantida Ciidanka Booliska

1. Ciidanka Boolisku wuxuu yeelanayaa hanti guurto iyo ma'guurto ah oo uu u adeegsanayo gudashada waajibaadkiisa, waana hanti qaran, cidina dan gaar ah uma isticmaali karto.
2. Dhammaan hantida ma guurtada ah ee Ciidanka Booliska waa la diiwaangelinayaa.
3. Taliyaha Ciidanka Boolisku wuxuu dejinayaa habraacyo maamul (Administrative procedures) oo si gaar gaar ah loogu maamulo hantida ciidanka.

### Qodobka 37aad
### Daryeelka Hantida Iyo Qalabka Booliska

Xubin kasta oo ciidanka ka mid ah waxa ku waajib ah ilaalinta, dayactirka iyo daryeelka hantida iyo qalabka Ciidanka Booliska ee uu masuulka ka yahay.

### Qodobka 38aad
### Hubka & Rasaasta

1. Dhammaan hubka ay sitaan xubnaha ciidanka waxa iska leh booliska Somaliland.
2. Ciidanka Booliska ayaa waajib ka saaran yahay inay siiso hub xubinta cusub ee ku soo biirta booliska, waxaana reebban in hub uu gaar ah oo uu leeyahay la yimaaddo xubinta cusubi.

3. Marka laga reebo xaaladaha hawlgalka ee daruuriga ah, xubinta booliska ah ee ku jirta hawl shaqo waxay qaadan kartaa oo kaliya budh iyo baaskoolad.
4. Qaadashada hubka ka badan baaskoolad waxa la jidayn karaa oo kaliya marka ay jirto xaalad adag oo keenaysa in loo baahdo.
5. Wakhtiga mudaharaadyadu ay dhacayaan Ciidanka Boolisku waa in aanay isticmaalin rasaas nool ee beddelkeeda ay isticmaalan rasaasta aan noolayn, biyo tuurayaasha, qiiqa dadka kaga ilmaysiiya oo qudha.

## Qodobka 39aad

## Miisaaniyadda ciidanka Booliiska

1. Dhaqaalaha ciidanka booliisku wuxuu ka iman karaa:
   b. Xaddiga miisaaniyada Qaranka looga qoondeeyay Booliiska
   t. Kaalmo xukuumada dhexe ku kabto
   j. Kaalmo D/hoose ku kabaan
   x. Qormada ganaaxyada sharcigu uga qoondeeyay
2. Maaliyada booliiska waxaa lagu maamulayaa hab waafaqsan Xeerarka xisaabaadka dawlada, xeer- nidaamyada booliiska iyo hab-raaca maamul ee xeerkan lagu sheegay.
3. Taliyaha booliiska iyo saraakiisha uu u igmadaa waxay masuul ka yihiin ilaalinta, kormeerka, dabagalka habsami u maamulka maaliyada booliiska.

.

## Qodobka 40aad

## Hanti Dhawrka Xisaabaadka Ciidanka

Taliyaha Ciidanka Boolisku wuxuu abuurayaa hantidhawr gudaha ah (Internal Auditor) oo ciidanka gaar u ah oo ka kooban saraakiil aqoon dheer iyo waaya'aragnimo u leh xisaabaadka oo si wakhtiile ah ama mar kasta oo loo baahdo shaqayn kara.

## Qodobka 41aad

## Qaadhaanka Ciidanka Booliska

Ciidanka Boolisku wuxuu samaysan karaa sanduuq dhaqaale oo ku yimaadda qaadhaanka ciidanka booliska dhexdooda, waxaana qeexi doonna xeernidaamiyaha.

## Qodboka 42aad

## Masuuliyadda Denbiga Iyo Ciqaabtiisa

1. Xubnaha Ciidanka Boolisku waxay masuul ka noqonayaan denbiyada ay sida badheedhka ah uga galaan Qaranka, waxaana loo raacayaa shareecada Islaamka, xeerarka ciidamada iyo Xeerka Ciqaabta Guud.

2. Denbiyada ay sida badheedhka ah uga galaan ciidamadu dadweynaha waxa awood u leh oo loo gudbinayaa Maxkamadda Ciidamada Qaranka, si waafaqsan qodobka 104aad faqraddiisa 1aad ee Dastuurka JSL iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka xeerLr.107/2024.
3. Haddii Guddida cabashadu u aragto in aan falka xubintu gaadhsiisnayn in maxkamad lagu horgeeyo ama ay maxkamad u gudbinta ku waafaqi waydo guddidu, xubinta waxa lagu anshaxmarinayaa si'waafaqsan Xeerka Anshaxa Ciidanka Booliska.
4. Xubnaha Ciidanka Booliska loo raaci maayo fal kasta oo ay ku galaan isticmaalka awoodda xeerarku jideeyeen oo la xidhiidha gudasho waajib is difaac, xaalad baahiyeed sharci u adeegsi hub, si'waafaqsan qodobbada 33, 34, 35 & 36aad Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 43aad
## Masuuliyad Madani

1. Xubnaha Ciidanka Booliska looma raaci karo masuuliyad madani ah ama magdhaw ka dhashay fal ay ku galeen iyagoo sharciga ilaalinaya oo gudanayana waajibaadkooda ciidan, si'waafaqsan sharciga.
2. Dawladda ayaa masuul ka noqonaysa magdhawga madani ee ka yimaadda:
   **b.** Falka xubinka Ciidanka Boolisku ku galo amar sarkaal awood u leh.
   **t.** Falka xubinka ciidanku ku galo isagoo shaqadiisa gudanaya, si kama' ah ama taxadir darro ah.
   **J.** Magdhawga ama cawilcelinta ka dhalata denbi ciqaab ah oo xubin ciidan ku gashay iyada oo shaqadeeda gudanaysa.
   **X.** Fal kasta oo kale oo sharciga madanigu magdhawgeeda ku waajibinayo dawlada.
3. Qof kasta oo weerar hub kala hor yimaadda ama xoog isku hortaaga Ciidanka Booliska oo si sharciga waafaqsan u fulinaya amar ama hawlgal sharci ah, wuxuu masuul ka noqonayaa, khasaaraha naf ama maal ah ee soo gaadhay qofkaas, cid sadexaad ama ciidanka hawsha fulinaya si waafaqsan qodobbada 33, 34, 35 & 36aad Xeerka ciqaabta guud.
4. Xaaladaha lagu sheegay faqradda 3aad ee qodobkan waa in baadhis madaxbannaan lagu sameeyo, si loo xaqiijiyo cidda masuuliyadda qaadaysa.
5. Baadhista madaxabannaan ee lagu sheegay faqradda 4aad ee qodobkan, waxa samayn kara guddida dabagalka iyo cabashooyinka dadweynaha ee ku xusan cutubka 8aad ee xeerkan.
6. Ciidanka Boolisku masuul kama noqon karo dhibta soo gaadhay qof si sharci ah loo hayay ama loo qabanaayay falka ay xubinta booliska ahi ku gaysato ka hortag baxsasho ama joojin baxsi, haddii uu adeegsanayo qofku hub la mid ah ka uu boolisku sito, marka xubinta boolisku si taxadir leh u dhaqantay.

## Qodobka 44aad

## Xidhiidhka Ciidanka Booliska Iyo Maamullada Gobollada

1. Nidaamka hawlgal ee booliska ee ilaalinta amarka iyo kala danbayntu (law and order) wuxuu noqonayaa mid daadejisan oo heer gobol iyo degmo ah.
2. Hawlaha booliska ee la xidhiidha ilaalinta amarka iyo kala danbaynta (law and order) ee heer gobol wuxuu kala shaqaynayaa maamulka gobolka, iyadoo uu wakiil uga yahay taliska qaybta booliska ee gobolka.
3. Hawlaha booliska ee ilaalinta amarka iyo kala danbayntu (law and order) ee heer degmo wuxuu kala shaqaynayaa maamulka degmada.
4. Haddii ay dhacdo xaalado nabadgelyo darro oo saameeya laba degmo ama ka badan ee isla hal gobol, waxa agaasinka hawsha booliska ka masuul noqonaaya taliyaha qaybta booliska ee gobolkaas, isagoo ka amar qaadanaya guddoomiyaha gobolka.
5. Guddoomiyayaasha gobolladu waxay qaybaha ciidamada booliska ee gobolladooda ka caawinayaan wax kasta oo suuragal ah oo ay hawshooda ku fulin karaan.
6. Haddii degmooyinka hawsha nabadgelyada laga qabanayaa ku yaalliin laba gobol ama wax ka badan waxa awoodda hawlgelinta Ciidanka Booliska la wareegaya taliyaha ciidanka, isagoo la socodsiinaya wasiirka arrimaha gudaha iyo amniga.
7. Degmo kastaa waxay lahaanaysaa saldhig ama saldhigyo boolis, ciidanka ka tirsan saldhigga booliska ayaa maamulka degmada kala shaqaynaya xoojinta nidaamka iyo sugidda ammaanka.
8. Ciidanka Booliiska ee degmo kasta waxay D/hoose kala shaqaynayaan ilaalinta ammaanka, amarka iyo kala daynbayta (law and order), cashuur ururinta iyo arrimaha kale ee ay maamullada degmooyinku gacan siin ka dalbadaan ee sharciga waafaqsan.
9. Guddoomiyayaasha golayaasha deegaanka ee degmooyinku waxay saldhigyada booliska ee degmooyinka ka taageerayaan baahiyaha aasaasiga ah, sida biyaha, laydhka I.W.M ee awooddooda dhaqaale ka baxsan.
10. Haddii ay dhacdo in dembiile ka baxsado degmada uu dembiga ku galay, una gudbo degmo kale, soo qabashadiisu waa waajib saaran saldhigga booliska ugu dhow, sidoo kale booliska degmada uu dembiga ku galay waa raacdaysan karaan, si loo soo qabto ; waxaase' shardi ah inay la socodsiiyaan booliska degmada ay ka hawlgalayaan.
11. Wada shaqaynta Ciidanka Booliska iyo maamullada gobollada iyo degmooyinka ee ku xusan qodobbada sare ee xeerkan, waxba uma dhimayso, wada shaqaynta iyo waajibaadyada dhinacyada ee lagu sheegay Xeerka Anshaxa Ilaalinta Nabadgalyada ee Xeer Lr 51/2012, Xeerka Waddo Marista, Xeerka Socdaalka iyo xeerarka kale ee dalka.

# CUTUBKA 12AAD

# QODOBBADA GABAGEBADA

## Qodobka 45aad

## Amarrada & Tilmaamaha (Tallooyin) Joogtada ah.

Taliyaha Ciidanka Booliisku wuxuu awood u leeyahay markii waqti la joogaba inuu soo saaro:

b) Awaamiir joogto ah oo la xidhiidha hagaag u socodsiinta arrimaha uu dhigayo xeerka iyo xeernidaamiyuhu.

t) fasaxyada, shaqo qorista, mushaharka, beddelka, shaqo ka saaridda, tababarrada,
j) Oggolaanshaha isticmaalka hubka iyo rasaasta.
x) U dhammaystirka lebiska iyo qalabka xubnaha ciidanka
kh) Wadashaqaynta booliska iyo hay'adaha kale ee Dawladda.
d) Wixii awaamiir ah ee sharciga waafaqsan ee fududaynaya hawlaha ciidanka ama kartida iyo anshaxa hagaagsan ee ciidanka ama arrimo kasta oo la xidhiidha arrimaha kor ku xusan.

## Qodobka 46[aad]
## Kormeerka dhaqangelinta & dhammaystirka Xeerkan

Kormeerka dhaqangelinta xeerkan iyo dhammaystirka xeerarka, iyadoo la soo saarayo xeernidaamyada, hagayaasha, habraacyada iyo xafiisyada uu dhisayo, waxaa masuul ka ah Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha JSL.

## Qodboka 47[aad]
## Awoodda Maamul ee Xeerka

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudahu isagoo kala tashanaya Taliyaha Ciidanka Booliska, wuxuu soo saarayaa xeernidaamiye aan ka hor imanayn xeerkan oo uu xeerkan ku dhaqangelinayo kuna faahfaahinayo, ugu badnaan sannad gudihii oo ka bilaabanta maalinta xeerku dhaqangalo.

## Qodobka 48[aad]
## Tirtirid

Waxa la tirtiray ama la laalay xeer kasta oo xeerkan ka hor imanaya.

## Qodobka 49[aad]
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka golayaasha xeerdejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**